



Xaafado loogu talogalay dadka oo Dhan



Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Nolol tayo sare leh, qurux dabici ah iyo dhaqaale kobcaya ayaa soo jiita dad cusub in ay soo degaan Seattle. Tan iyo 2010, magaallada waxaa ku soo kordhay oo soo degay in badan dad gaaraya 105,000 qof, waxaa ayna ka sara mareen 700,000 sannadkii 2017. Mid ka mid ah saameyn ta uu reebay kobacan waa kor-u-kaca qimaha guryaha, oo abuurtay in uu koror ku yimaado xaafadaha u gaarka ah guryaha halka-qoys ay deggaan. Oggolaanshaha guryo dheeraad ah in laga hirgeliyo soonayaasha u gaarka ah guryaha halka-qoys degga, gaar ahaan goobaha qaliga ah, waxaa ay muhiim u tahay in la joojiyo kororka degdega ah ee barokaca bulshooyinka ugu nugul Seattle.


Fursado loogu talogalay dad badan in ay ka helaan meelo ay ku noolaadaan gaar ahaan Seattle waxaa ay sidoo kale gacan ka geysan doontaa in meesha laga saaro caqabadaha horseeday hab-dhaqanka faquuqa isirkha la xiriira ee ka jira Seattle. In la sameeyo hab loo qaybiyo degaamo oo wax laga beddeli karo oo dhiirrigelaya xaafado ay dad kala duwan ku nool yihiin waxaa ay:

- taageeri kartaa ganacsiyada yaryar
- Kordhin kartaa joogtaynta deegaanka
- Kor-u-qaadi kartaa yoolalka dadaalka caddaaladda bulshada iyo isirkha
- Kordhin kartaa in la helo meel ay dad badan maraan
- Sii wanaajin kartaa in la helo xaafado lagu socon karo
- Abuuri kartaa fursado loogu talogalay jiilalka mustaqbalka, iyo sidoo kale in shaqaalaha dakhligooda uu hooseeyo, ay magaallada ku noolaadaan

Guddiga Seattle Planning Commission ayaa qaabilay shaqadan isaga oo rajeynaya in uu sii wado wadahadalkan lagama maarnaanka ah oo waqtigana ku habboon ee ku saabsan dib-u-eegista siyaasadaheenna isticmaalka dhulka.

Nisbooyinka Guri-Lahaanshaha ee Isir iyo Qowmiyad Ahaan

Xogta: Qiyaasaha 5 Sano ee 2016 American Community Survey



**Yoolka aasaasiga ah ee warbixinta
waa in la dhiirrigeliyo dib ugu
noqoshada qaababka guryaha iyo
horumarinta isku jirka ah ee laga
helo xaafadaha qadiimiga ah iyo inta
badan xaafadaha lagu dhex lugeyn
karo ee Seattle.**

Xaafado loogu talogalay dadka oo Dhan

Soo-koobidda U-fiirsashada

Qaybo badan oo Seattle ka mid ah ee looto kasta loo xaddiday hal guri ayaa si dhaqso ah u noqonaya qaali, oo ka reebaysa dad badan.

- Qiimaha guryaynta ee degaamada loo qoondeeyay halka-qoys ayaa sii kordhaya.** Laga soo bilaabo bisha Agoosto 2018, qiimaha dhexdhedaadka ah ee guriga ku yaalla Seattle waa \$753,600–oo ah koror ka badan \$100,000 laga soo bilaabo Febraayo 2017.
- Kor-u-kaca qiimaha guryaha waxaa uu saameeyaa dadka hadda deggan iyo kuwo mustaqbalka.** Kor-u-kaca canshuuraha guryaha waxaa ay ku khasbi karaan milkiilayaasha guryaha ee dakhligooda-hooseeya in ay ka baxaan guryahooda, iyada oo carruurta ku koray magaallada Seattle laga yaabo in aysan awoodin in ay ku noolaadaan magaallada marka ay qaangaaraan.
- Iyada oo guryo waaweyn, oo aad qaali u ah ay beddelayaan kuwa yaryar, sifadii lagu yaqaanay xaafadda waa ay isbeddelaysaa inkastoo uu jiro hab qaybin degaamo ee guryaha halka-qoys.** Cabbirka celceliska ah ee guryaha sida gaarka ah u taagan ee ku yaalla Seattle waxaa ay ka weynadeen in ka badan 1,000 sq. ft. (cagood oo laba-jibaaran) tan iyo horaantii 1900 markaa oo la joogay berisamaadkii la xiisaynayay qaabka guryaha daaraada leh. Keliya 3 marka la eego 10 qoys kasta ee iska leh guriga ay deggan yihiin ayaa sameeya in ka yar dakhliga dhexdhedaadka ah ee degaanka. Waxaa jira kala duwanaansho dhaqaale oo yar oo u dhaxeeyaa qoysaska guryaha iska leh marka la eego qoysaska kiraysta.
- Inkastoo ay Seattle kobacday, degaamada qaar ee magaallada waxaa deggan dad ka yar kuwii degganaa 1970.** Inkastoo magaallada ay ku soo biirreen in ka badan 180,000 degganayaal tan iyo 1970kii, degaamada qaar ee magaallada ayaa waxaa hoos u dhac ku yimid dadka deggan. Degaamadaas waxaa ay aasaasi ahaan ka kooban yihiin meelo loo qoondeeyay guryo hal-qoys oo lootooyin waaweyn ku yaalla.


Kala duwanaanshaha u dhaxeeyaa noocyada guryaha waxaa caqabad ku ah qaddarka meelaha loo qoondeeyay guryaha halka-qoys.

- Seattle ma laha kala duwanaansho u dhaxeeyaa noocyada guryaha ee diyaafadin kara qoysas qaybo kala duwan ah.** Inta badan guryaha ku yaalla Seattle waa midkood guryo uu deggao hal-qoys ama guryo qaybo yaryar ah (apartment) oo dhismooyin waaweyn ku yaalla. Qaybaha cusubani intooda adan waxaa ay ku yaallaan dhismooyin waaweyn iyo guryo keligooda taagan sida guryaha isku xigxigga ee safka u dhisan, iyada oo tirada dhismayaasha guryaha yaryar uu hoos u dhac ku yimid.
- Qaddar yar oo dhulka Seattle ah ayaa saamaxa deggaan ay deggi karaan qoysas badan.** Afar-meelood saddex ee dhammaan dhulka ay reer Seattle ku noolaan karaa ayaa loo qoondeeyay guryaha halka-qoys. Tani macnaheedu waxaa weeye in qoysaska haysta khayraad dhaqaale ee awoodi kara guri keligiisa taagan in ay dooran karaan in ay ku noolaadaan meelo kala duwan marka loo eego kuwa aan awoodi karin guri halka-qoys ama doorbida nooc guryo kale oo ka duwan.

Dakhliga oo ku saleysan

Guri-lahaanshaha


Xogta: CHAS 2010-2014.



Keliya 3 marka la eego 10kii qoys ee iska leh gurigooda ayaa sameeya in ka yar dakhliga dhexdhedaadka ah ee degaanka. Waxaa jira kala duwanaansho dhaqaale oo yar oo u dhaxeeyaa qoysaska guryaha iska leh marka la eego qoysaska kiraysta.

Qaybaha ee Nooca Dhismaha

Xogta: Qiyaasaha 5 Sano ee 2016 American Community Survey



Xaafado loogu talogalay dadka oo Dhan

Soo-koobidda U-fiirsashada

Meelaha loo qoondeeyay guryaha halka-qoys waxaa ay xaddidayaan fursadaha noocyada guryaynta ee ay u dhan yihiin dadka da'doodu kala duwan tahay ee ku jira marxaladaha nolosha ee kala duwan.

- Seattle waxaa ay leedahay dad isbeddelayada oo leh baahiyoo guryo oo aad u kala duwan, welina siyaasadaha guryaynta waxaa ay u xaddidaan ku dhowaad kala-bar dhulka Seattle hal nooc oo guryayn ah.** Tirada guud ee qoysaska haysta carruurta ayaa batay tan iyo 2010. Tirada qoysaska leh dadwaaweyn oo ay da'doodu ka weyn tahay 65 san ayaa sidoo kale badanaya. Tani waxaa ka mid ah dadka carruurtooda koray ee laga yaabo in ay raadinayaan in ay guriga iska yarreyaan balse doonaya in ay xaafadda sii deganaadaan.
- Ballaarinta guryaynta la doortay ee meelaha loo qoondeeyay guryaha halka-qoys waxaa ay u baahan tahay in ka badan qaybo la deggo iyo guri yar oo dayr-dambeedka ku yaalla.** Xataa iyada oo la qaataya xeerar aad u dabacsan, daraasad lagu sameeyay Magaallada waxaa ay qiyaastay in keliya ilaa 3,330 qayb dheeraad oo la deggi karo in laga dhisi doono magaallada oo dhan 10-ka sano ee soo socda.

Inta badan xaafadaha la doonayo iyo kuwa lagu lugeyn karo ee Seattle waxaa la dhisay ka hor inta aan la sameyn guryaha halka-qoys loo qoondeeyay iyo cabbiraadaha lootada ugu yar.


- Jaangooyooyin la sameeyay 1950kii ayaa ka hortagaya horumarinta cusub in ay abuurto xaaafadaha ay magaallada yeellato oo kala duwan, lagu lugeyn karo, oo lagu noolaan karo kuwaas oo mar ku baahsanaa Seattle.** Meelo badan oo ka mid ah meelaha maanta loo qoondeeyay guryaha halka-qoys waxaa loo qoondeeyay "Degmada La Dego ee Labaad" sannadkii 1923, kuwaas oo oggolaa guryo ay deggaan qoysas badan. Qaar badan oo ka mid ah dhismayaashaas ayaa maanta jira, balse hadda lama dhisi karo, inkasoo guryayn ay deggi karaan qoysas badan oo yaryar ay ku habboon yihiin meelaha loo qoondeeyay guryaha halka-qoys degga.

Habka qaybinta degaamada hadda ma dhiirrigeliyo helitaanka loo siman yahay ee hantida iyo tas-hiilaadyada dadweynaha.

- habka qaybinta degaamada ee guryaha halka-qoy waxaa uu xaddidaya tirada qoysaska ee u jira masaafo loo lugeyn karo jardiimooyinka iyo iskuullada.** Kharashka badan ee lagu iibsanayo guriga ku yaalla degaanka guryaha halka qoys waxaa uu xaddidaa helitaanka adeegyada dhaqanka iyo kuwa aasaasiga ee ku saleysan dakhliga.
- Habka qaybinta degaamada hadda wuxuu sii wadayaa dhaxalka u diididda, oggolaanshaha isir kala-sooca, iyo in uu farqi weyn uu ka dhex jiro guri lahaanshaha.** Magaallada Seattle, caddaanka deggan ayaa leh boqolkiiba nisbooyinka sare oo ah guryo-lahaanshaha marka loo eego dhammaan kooxaha qowmiyadaha/isirrada kale. Farqiga isirkka la xiriira ee guri-lahaanshaha ee hadda jira waxaa uu ka dhashey siyaasadaha guryaynta ee takoorka ku saleysan ee dhigay reeraha midabka faa'iido-darro isla-markaas ahayd iyo mid joogto ah sababtoo ah waxaa loo diiday fursado ay ku helaan sinnaan loo marayo guri-lahaansho.

Qaybinta Degaamada Oggolaanaya Iisticmaalka Degaan Lagu Noolaado


Data: City of Seattle



Afar-meelood saddex ee dhammaan dhulka ay reer Seattle ku noolaan karaa ayaa loo qoondeeyay guryaha halka-qoys.

Qaybinta Qoysaska Milkiilayaasha ah Isir Ahaan

Source: 2016 ACS 5 Year Estimates



Inta badan dadka guryaha ku leh Seattle waa caddaan, iyada oo in ka yar saddex-meelood meeil milkiilayaasha ay yihiin qoysas madow ama midab leh.

"Seattle waxaa qaabeeeyay taariikhda ay u leedahay faquuqa isirada iyo barokicinta dhaqaale ee bulshooyinka midabka ama madowga ah."

- Seattle Comprehensive Plan



Xaafado loogu talogalay dadka oo Dhan

Soo-koobidda U-fiirsashada

Faa'iidooyinka iyo culeyska kobaca si siman
looguma qaybin Seattle oo dhan.

- Kobaca intiisa badan waxaa uu ka dhacay qayb yar oo magaallada Seattle.** Tan iyo 2006, in ka badan 80% ee kobaca Seattle waxaa uu ka dhacay xaafadaha iyo xarumaha magaallada ee u dhigma in ka yar afameelood meel dhulka Seattle.
- Qaybaha degaamada loo qoondeeyay guryaha halka-qoys waxaa laga ilaaliyay in ay diyaafadiyaan qoysas cusub.** Keliya 5% ee dhammaan qaybaha saafiga ah ee cusub ee Seattle min 2010 - 2017 ayaa lagu dhisay meelaha loo qoondeeyay guryaha halka-qoys, inkastoo ku dhowaad kala-bar dhulka Seattle loo qoondeeyay guryaha halka-qoys. Qaar adan oo ka mid ah degaamadaas waxaa ay u dhow yihii meelo ay dadka maraan, waxaa ayna ka faa'iideen maal-gelinnada dowladda sida jidodka lagu lugeeyo, beero jardiimo ah, iyo iskuullo; hase-yeshees, qaybinta degaamada ee adag waxaa ay ka hor-istaageen in ay helaan kobaca loo marayo guryayn badan.
- Xadaynta guryaynta degaamada qiimaha hantida maguurtada ah uu sarreeyo waxaa ay caddaadiska horumarinta u wareejinaya degaamada horay halis ugu jiray barokaca.** Guri iibsadayaasha suurtagalka ah ee ka soo carara qiimaha badan, ee degaamada guryaha halka-qoys waxaa ay ikhtiyaaro ka raadiyaan xaafahada qiimahooda la goyn karo, oo dhiirrigelinaya barokaca dadka hadda deggan, ganaciyada yaryar, iyo degganaansho dhaqameedka. Habkan waxaa uu faa'iido siyaasadeed oo iska cad uu siyyaa qaybo dadweynaha ka mid ah--dadka taajiriinta ah, oo inta badana ah caddaanka guryaha iska leh--in ay helaan awood badan oo ay ku go'aamiyaan sida ay Seattle u ekaanayso, sida ay u kobcayso, iyo halka dadka deggan ay ku noolaan karaan.

Isticmaalka Degaanka La Oggol Yahay Nooc Ahaan



Seattle waxaa ay u baahan tahay istiraatijiyo
ay ku kobcayso oo ay ku noqonayso mid leh
xaafado si buuxda loogu dhex socon kara.

- Qaybaha Degaanka guryaha halka-qoys ee Seattle waxaa ay oggolaanayaan hal nooc oo horumarin ah ee aan bixin kala duwanaansho iyo cufnaan ay ku noqonayaan xaafado lagu dhex socon karo oo u fiican dadka socotada ah.** Qaybaha Degaanka guryaha halka-qoys waxaa ay is-hortaagaan awooddha in si kororta loogu daro isticmaalka isku-jirka ah iyo cufnaanta lagama maarmaanka ah si loo taageero in lagu dhex lugeeyo oo gaari lagu maro meelo badan oo magaallada ah.

Keliya 20% qaybaha halka-qoys ayaa deggan dad kiraystay, kiraystayaashana dhakhligooda waxaa ay u badan tahay in ay ka yar yihii kuwa milkiiliyaasha.

5tii guriba 1 guri oo guryaha halka-qoys ah ayaa deggan dad kiraystay



Xaafado loogu talogalay dadka oo Dhan

Istiraatiijiyadaha oo Kooban

Horumari istiraatiijiyadda kobaca Seattle si loogu daro meelo la dego magaallada oo dhan.

- U ballaari dhammaan xaafadaha magaallada ee dhisan iyada oo loo yeelato hoos lagu socod karo ilaa 15-daqiiqo meelaha sida joogtada ah loo maro. Hadda la joogo, dhawr ka mid ah xaafadaha magaallada ee Seattle ayaa leh xudduudo aad cariiri u ah, oo xaddidaysa tirada qoysaska heli kara adeegyadan iyo tas-hiilaadyada.
- **Dhiirrigeli marxaladaha kala duwan ee istiraatiijiyadda kobaca Seattle si loo dhiso xaafado dhammeystiran oo ka baxsan magaallada.** Istiraatiijiyadda kobaca Seattle waxaa ay abuuursaaxa xaaladda digaag-iyoo-ukun: meel guud ahaan u baahan in ay ka soo baxdo qeexitaanka meel si joogto ah loo maro si ay u noqoto xaafad magaallada ah ama loo baariyo oo dad loogu daro, welina tirada dadka loo baahan yahay si loo taageero in si joogto loo maro ayaa adag in lagu guulaysto iyada oo aan la dhisin ama la ballarin xaafad
- **Samee shuruudo cusub oo loogu talogalay cayimidda iyo kobcinta xaafado magaallo oo deggaan ah oo cusub oo lagu qaabeeeyay adeegyada aasaasiga ah ee jira ama qorsheysan.** Istiraatiijiyad oggolaanaysa in guryo badan laga dhiso beeraha iyo iskuullada agtooda waxaa ay xaqijjin doontaa in bulshooyika ay ku kobcaan maal-gelinta dowladda ee gacanta ka geysata meel ku habboon in lagu noolaado.



Photo: Seattle Dream Homes

Guri meel gees ah ku yaalla oo laba qaybood ka kooban ee Seattle.

Abuur qayb degaan cayiman oo kor-u-qaadaysa qaabka muuqaalka ee loogu talogalay iyo qiyaasta dhismeyaasha inta ay ka noqonayso mid siman oo loo dhan yahay.



- **Dib-ugu-magacaaw qaybaha degaanka "Single-Family" degaan ah "Neighborhood Residential."** Calaamadda 'Single Family Zone' waa magac bixin aan habboonayn, shaqsyaad ahaan iyo dadka qolola wadaagga waxaa ay ku wada noolaan karaa guri iyaga oo aan qoys ahayn. In laga beddelo magaca soone oo loo beddelo Xaafad Degaan ah ayaa si aad ah uga turjumaysa sifada soone, iyada oo aan soo jeedinayn in qoysas keliya ay ku noolaan karaan halkaas.

Kobci noocyada kala duwan ee guryaynta ee degaamada leh qaybaha aasaasiga ah ee nolosha.

- **Samee cayimid oggolaanaysa noocyoo guryayn badan in laga dhigo gudaha degaamada guryaha halka-qoys ee u dhow beeraha, iskuullada, iyo adeegyada kale.** Oggolaanshaha buuxista sii kordhaya ee noocyada guryaha "dhexdooda bannaan" ee degaamadan waxaa ay oggolaan doontaa in qoysas badan ay helaan adeegyadan, in la dhiso taageerada degmooyin ganaci iyo meelo la maro oo wanaagsan, dhammaanna waxaa la sameyn doonaa iyada oo la joogtaynayo qiyaasak degaanka la doonayo.
- **Samee heerarka nakh-shadda ee loogu talogalay noocyada guryaha kala duwan si loo saamaxo horumarka la jaanqaadi karo qiyaas ahaan guryaha hadda jira.** Hubinta in horumarka cusub in uu qiyaas ahaan la jaanqaado in ay u baahan tahay in la abuuro heerar nakh-shado iyo horumarin loogu talogalay noocyada guryo gaar ah oo la aqbali karo.
- **Dib-u-eegis ku samee xeerarka meelaha gaariga la dhigto si mudnaanka koowaad loo siiyo guryaha iyo goobaha dadweynaha ee loogu talogalay dadka marka loo eego kaydinka gawaarida.** In meel gawaarida la dhigto loogu baahdo goobta waxaa ay isticmaalaysaa boos loo adeegsan karo in lagu dhiso guryo dheeraad ah ama meel bannaan. In habkan mudnaan loo siiyo baabuurtta waxaa ay lid ku tahay yoolalkeenna cimillada iyo joogtaynta. Iyada oo jidadka guryaha gala iyo geerashyada weli la oggolaan karo, dadka lagama doonayo in boos u banneeyaan gawaarida iyaga oo ka dooranaya guryo ama boos loogu talogalay geedaha--gaar ahaan haddii ay doortaan in aysan lahaan gaari.

Xajiyaa guryaha hadda jira iyada oo lagu daraya noocyada guryo u oggolaanaya dad badan in ay ku noolaadaan xaafad kasta.

- Oggolow in guryaha hadda jira loo beddeelo guryo qaybo badan ka kooban.** In ay deggaan dad badan guryaha hadda jira waa istiraatijiyyad taabogal ah oo ka dhigaysa xaafadaha in la gaari karo oo u adeegsanaya khayraadka jira si in badan waarta.
- Oggolow qaybo dheeraad ah in laga dhisoo lootooyinka geeska ku yaalla, lootooyinka ku yaalla luuqyada iyo waddooyinka, lootooyinka ku yaalla geesaska soonaha.** Awoodda mugga qaadka sii korortay ee geesaska soonaha waxaa ay suurtagelin kartaa guryo badan oo kala duwan iyada oo ay ka soo baxayaan natijjooyin nakh-shad wanaagsan sababtoo ah waxaa ay bixin kartaa kala-guurka u dhaxeeya dhismooyinka qoysaska badan iyo guryaha gooniga u taagan.
- Dhiirrigelin maaliyadeed ku bixi sii jiridda guryaha hadda dhisan adiga oo ka dhigaya heerarka horumarinta kuwo wax laga beddeli karo marka qaybo dheeraad ah lagu daro.** Oggolaanshaha dib-u-dhacyo wax laga beddeli karo iyo baaxadda lootada waxaa ay fududaynaysaa in lagu daro qaybo dheeraad ah looto ama in la sii kala-qaybiyo iyada oo aan loo baahan in la dumiyoo guriga hadda dhisan.
- Bixi khayraad nakh-shadeyn iyo mid farsamo oo loogu talogalay milkiilayaasha dhulka iyo bulshooyinka si ay dib ugu horumariyaan oo ay u sii ahaadaan milkiilayaasha dhulka.** Kuwan waxaa ka mid noqon kara: in la adeegsado kaydka-xogta geographic information system (GIS) si loogu wargeliyo milkiilayaasha guryaha in dhulkooda uu gaar ahaan ku habboon yahay horumarinta la ballaariyo, abuurista qorshayaal hore loo ansaxiyay, fududaynta geeddisocodka oggolaanshaha, iyo in la baro milkiilayaasha guryaha wixii ku saabsan istiraatijiyyadaha maal-gelinta ee suurtagalca ah.



Dhismaha isku cabbirka ah ee diyaafadiya qoyska afarta ka kooban waxaa uu diyaafadin karaa afar qoysas oo xubno tiro kala duwan ka kooban.

Dhiirrigeli in horumarinta guryo aad la isku kuusay ee dhammaan lootooyinka.

- Yaree ama meesha ka saar shuruudaha cabbirka lootada ee ugu yar.** Ilaa 1957, Seattle ma yeelan cabbiraadaha lootada ugu yar ee soonayaasha halka-qoys, xaafado qadiimi ah oo badana waxaa ay lahaayeen guryo badan oo laga lootooyin yaryar. Guryahaas ee qiyaasta yaryar waxaa ay leeyihiin alaaboo hore badan oo waddada ku aaddan, sidaa darteedna wanaajinaya xaaladda dadka lugeynaya.
- Abuur dhiirrigelin maaliyadeed oo loogu talogalay in lagu dhisoo in ka badan hal qayb lootooyaalka ka weyn kuwa dhexdhexaadka ah.** Ugu baahashada ama dhiirrigelin maaliyadeed ku bixinta in ka badan hal qayb oo laga dhisoo lootooyinka waaweyn waxaa ay xaqiijinaysaa in dhulka loo adeegsado si aad u hufan iyada oo la taageerayo xaafadaha lagu dhex lugeyn karo.
- Xaddid cabbirka dhismayaasha halka-qayb ee cusub, gaar ahaan kuwa ku yaalla lootooyinka dhexdhexaadka ka weyn.** Yareynta qiyaasta iyo cabbirka la oggol yahay waxaa ay yareyn doontaa in dhiirrigelinta maaliyadeed si loogu beddeelo guryaha hadda jira kuwo waaweyn, guryo aad qaali u ah iyada oo la hubinayo in la bixiyo qaybo ku habboon inta uu le'eg yahay qoyska oo dhexdhexaad ah.

Hubi in guryaynta cusubi ay taageerayso qoysas aad u kala duwan.

- **Ha jiraan oo kordhi guryaha qoyska ku habboon iyo kuwo qoyska le'eg.** Si loo hubiyo in isbeddellada degaamada guryaha halka-qoys ka dhisan in aysan yareyn qaybaga weynaanta-qoyska, istiraatiijiyado buuxis ah waa in la nakh-shadeeyo si loo dhiirrigeliyo guryo cabbiraado iyo muuqaalo kala duwan leh oo si fudud u diyaafidiya qoyska.
- **Ka saar xadka degganaanshaha shaqsiyaadka aan qaraabada ahayn ee degaamada halka-qoys.** Xadka degganaanshaha ee shaqsiyaadka aan qaraabada ahayn (oo aan lahayn xad la xiriira shaqsiyaadka qaraabada ah) waxaa uu ciqaabaa dadka qolka wada degga ama qoysaska aan go'anayn, wuxuunna caqabad ku noqonayaa in guryaha qadiimiga ah ee waaweyn, in loo adeegsado guryo qayb ah ahaan (apartment). Qaybinta degaamada waa in keliya lagu maamulo tirada dadka degga dhismaha iyo qaabka dhismaha, ee ma aha xiriirka ka dhaxeeya dadka deggan.



Photo: NWMLS

Guri laba qaybkood ka kooban oo Seattle ku yaalla, oo muujinaya kala duwanaanshaha qiyaaska ee dhismayaasha qoysaska badan ay deggi karaan.



Photo: NWMLS

Dhismo hal dabaq ah oo afar-qaybood ka kooban ayaa la jaanqaadi kara qiyas ahaan guryaha ku hareeraysan, waxaa uunna ka hawlgeleinayaa waddada xakabado hore iyo meelo laga soo galoo.



Photo: PCRI

Dhismo yar oo saddex-qaybood ka kooban, oo casri ah.

Isitiraatiijiyadahan waxaa ay oggolaan doonaan dib u soo celinta tartiib tartiibka ah ee qaababka dhismaha taariikhiga ah iyaga oo gacan ka geysanaya dhawridooda xitaa annaga oo soo dhoweynayna in ay soo degaan dad badan oo leh dhammaan dakhliyada, da'yada, iyo isirro kala duwan.

Guddiga Seattle Planning Commission waxaa uu aqoonsan yahay in dadka degaanka badankooda in ay u tixgelin doonaan talo-soo-jeedinta ku qoran warbixintan mid la isku khilaafsan yahay qaarna waxaa ay u arki doonaan mid aan la soo dhoweynayn. Annaga kama dhigi karno fudayd. Tiro ka mid ah xubnaha Guddiga ayaa naf-ahaantooda ah dad deggan xaafadaha hadda la joogo loo qoondeeyay guryaha halka-qoys waxaa ayna si fiican u fahamsan yihiin soo-jiidashada qaabka hore, gaar ahaan xaafadahii hore.

Ujeeddada warbixintan ayaa ah in ay soo-jiidato oo ay sii-wado qaabka iyo baaxadda xaafadahan iyada oo loo sameynayo ikhtiyaaro badan milkiilyaasha iyo kiraystayaasha hadda iyo kuwo mustaqbalka.

Ku saabsan Guddiga

Guddiga Seattle Planning Commission waxaa uu kula talinaya Duqa Magaallada, Golaha Magaallada iyo waaxaha Magaallada yoolal qorsheyn ballaaran, siyaasado iyo qorshayaasha horumarinta Magaallada. Shaqada Guddiga waxaa qaabeeya qorshaha Comprehensive Plan iyo himiladiisa ee loogu talogalay Seattle Qarniga 21aad, iyo ballanqaadka ka-qaybgelinta muwaadiniinta shaqada qorsheynta iyo ka shaqeynta sidii loo gaari lahaa yoolalkan.

Seattle Planning Commission waa guddi ka kooban 16-xubnood oo la-taliyayaal ah, madax-bannaan, oo ay soo magacaabaan Duqa Magaallada, Golaha Magaallada, iyo Guddiga laf-ahaantiisa. Xubnaha uu Guddiga ka kooban yahay waa mutadawaciin ah oo u keenaya aqoon iyo khibrad ballaaran iyo aragtiyo kala duwan doorarkan.

Liiska Guddoomiyayaasha



Michael Austin,
Pioneer Square



Eileen Canola,
Victory Heights



Sandra Fried,
Columbia City



David Goldberg,
Wallingford



Veronica Guenther,
Capitol Hill



Grace Kim,
Capitol Hill



Ellen Lohe,
Mt. Baker



Rick Mohler,
Tangletown



Tim Parham,
Othello



Marj Press,
Wallingford



Kelly Rider,
Whittier Heights



Julio Sánchez,
Central District



Amy Shumann,
Hilman City



Lauren Squires,
Othello



Jamie Stroble,
130th station area



Patti Wilma,
Wedgewood